Shintiriska Caruurta Xanaanada
Xaanshiyaha Xogta

Xaanshida #1: Waqtiga: Shintiriska Xanaanada ee Dugsiyada Dadweynaha Boston

Xaanshida #2: Tirooyin Muhim ah iyo Xogta Asalka ah

Xaasnhida #3: Xulashada Dugsiyada

Xaasnhida #4: Booqashada Dugsiyada

Xaasnhida #5: Diiwaangelinta Caruurta Xanaanada

Xaasnhida #6: Maalin Dugsiyeedka Caadiga ah

Xaasnhida #7: Daryeelka Dugsiga Kahor iyo Kadib

Xaasnhida #8: Gaadiidka

Xaasnhida #9: Isudiyaarinta Dugsiga: Meelaha la Tago, Waxyaabaha la Sameeyo!

Xaasnhida #10: Caafimaadka iyo Badbaadinta Caruurta Xanaanada

Xaanshida #1

Xadka Waqtiga:

Shintiriska Xanaanada ee Dugsiyada Dadweynaha Boston

Sanadka Idil: Qoysasku Waxbay Islabartaan

- Markaad booqato dugsiyada, soo qaado xaanshida weyn ee Shintiriska ay ku qoran tahay "Hoygu waa Dugsiga Kowaad ee Ilmaha" (*Home is a Child's First School).* Waxay sharxaysaa hawlo waxbarasho bil kastaba ee maaweelo leh.
- Fiiri xaanshida isudiyaarinta dugsiga (#9), ay ku jiraan meelo badan oo lacag la'aan lagu tago iyo waxyaabo badan oo la sameeyo!

Sebtembar – Oktoobar 2007: *Ka Feker Dugsiyada*

- Soo hel dugsiyada ilmahaagu codsan karo adoo wacaya Xarumada Waxtarmada Qoyska midkood ee ku qoran dhabarka xaanshidan ama booqo: www.bostonpublicschools.org.
- Bilaw inaad ka fekerto waxad dugsi ka rabto (meesha, tirada fasalka, iwm.). Ka fiiri xaanshiyaha xogta #3 iyo #4 ra'yiyo iyo warqad hawleed.
- Tag sanadkiiba Carwada Dugsiyada ee DDB bisha Oktoobar 27, min 10:00 ilaa 1:00 Galabti laguna qaban doono Xarunta Cayaaraha Reggie Lewis sidaad ula kulanto maamulayaalka, macalimiinta, iyo waalidka kale, una fiirsato shaqa-dugsiyeedka ardayda. Waa si wax weyn aad uga warhayso dugsiyada.

Nofambar 2007– Janaayo 2008: *Booqo Dugsiyada*

- Soo qaado kaltanka "Waqtiga Sahaminta Dugsiga (*School Preview Time*) ee kuu sheegaya waqtiga dugsi kastaa kugu casuumo booqashada dugsiga. Kaltanada waxa laga helayaa Xarumada Waxtarmada Qoyska ee DDB oo dhan, Maktabadaha Dadweynaha Boston, Xarumada Beelaha Boston, iyo Xarumada daryeelka caruurta badankooda
- Qorshee inaad booqato ugu yaraan shan dugsi. Magaalada Boston iyo kuwa badan oo dadka shaqada siiyaa hadda waxay fidiyaan waqti aan lacagta lagaa jarin si aad u aragato dugsiyada oo shaqaynaya.
- Waxa waxtar leh inaad soo qaadato Xaanshida Booqashada Dugsiyada [V*isiting Schools* sheet *(#4)]* markaad booqanayso.

Janaayo 4 – Febraayo 1, 2008: *Isqoridda Dugsi*

- Booqo mid ka mid ah Xarumada Waxtarmada Qoyska oo ilmahaaga ka qor kana qaado hadiyad ah buugagta ilmahaaga iyo wax ka badan. Naga booqo Internetka "online" ama nagala hadal 617-63-LEARN xagga diiwaangelinta waqtiyadooda ama wixi meelo kale ah.
- Xusuunow waxad u baahan tahay inaad ugu yaraan liis geliso shan dugsi arjiga diiwaangelinta oo aad soo qaadato kuwa soo socda:
  - ✓ Warqad dhalasho asli ah ama dhuldhaafiye ee ilmahaga;
  - ✓ Sadex cadayn cinwaan (fiiri xaanshida # 5 xaga shuruudaha dhabta ah); iyo,
  - ✓ Arjiga dhaqtarkaaga oo cadaynta talaalada oo dhan ee ilmahaaga ilaa da'diisa 5-aad (fiiri xaanshida #5).

Gu'ga 2008: *WAXAD TIMID MEELAYNTAADII DUGSI*

- Qoysaska marxalada kowaad diiwaangelinta sameeya (Janaayo 4 – Febraayo 1) waxay ka helayaan jawaabta boostada 5 ilaa 6 wiig kadib marxalada isqorida kowaad.
- Hadaad ka mid tahay qoysaska yar ee aan ilmahaagu ka mid ahayn kuwa dugsiga lagu qoray. isla markiiba ku noqo Xarunta Waxtarmada Qoyska sidaad weli uga codsato dugsiyada wax ka banaan yihiin. (Fiiri Xaanshida #2 xagga xogta gaarka ah ee meelaynta Xanaanada K0, K1, iyo K2.)
- Diiwaangelintu waa u banaan tahay kuwaan la qorin maraxaladda kowaad, laakin xulashadu *aad* bay u sii yaraanaysa.
- Dugsiga cusub ee ilamahaagu wuxu kugu casuumaya imaatinka dugsiag sidaad u aragto qolfasalada, ood ula hadasho maamulaha iyo macalimiinta, ulana kulanto waalidiinta kale.
- Shintiriska Caruurta Xanaanada waxa boosta loogu diraa qoysaska xogta ku saabsan hawlo badan si laguugu caawiyo sida ilmahaagu dugsiga uga faa'iidaysan lahaa!

Kulaylaha 2008: *TAG KULANO GAAR AH KANA HEL ABAALGUDYO DUGSI*

- Kuwa dhowaan noqonaya xanaanada waxay helayaan Qardaaska Isudiyaarinta, ay ku jiraan DVD-ga "Waxan Ahay Diyaar" , hagaha kulaylaha, iyo shaatiga-t ee " waxan tegayaa xanaanada", kaasoo xaq u siinaya waqtiyada sheekooyin bilaash ah, booqashooyinka matxafka iyo hawlaha kale ee kobcinaya jidhka iyo maskaxdaba.
- Dabagal ku samee xogta boosta xagga hawlaha gaarka ah ee bilawga dugsi, ay ku jiraan Xaflada Xanaanada ee Magaalaweynta lagu qabto Matxafka Caruurta Boston.
- Hadii ilmahaagu u qalmo gaadiid, waxad boosta ka helaysaa warqada meelaynta baska aakhirka bisha Agost.

Sebtembar 2008: *BILAW DUGSIGA!*

- Dugsiga xanaanadu wuxu bilaabmaa Isniinta ka dambaysa Maalinta Shaqaalaha. Caruurtu waa inay gashadaan shaatiga jaalada ah ee "waxan gelayaa xanaanada" maalintaas!

Xarumada Waxtarmada Qoyska e DDB (FRCs):

Saacadaha shaqada: 9:00 aroorti – 5:00 galabti Arbacada maahana oo ah: 9:00 aroorti – 1:30 galabti

1216 Dorchester Ave
Dorchester, MA
(617) 635-8015
(gargaarku waa Ingiriisi, Isbanish, Bortuqiis, Shiine, Keebfeerdi, Kiriyool, Faransiis & Fiyatnamiis)

55 Malcolm X Blvd.
Roxbury, MA
(617) 635-9010
(gargaarku waa Ingiriisi, Isbanish, Shiine, Giriig, Carbeed, Somaali, Bortuqiis, Fiyatnamiis, Faransiis, Hayshi Kiriyool, Keebfeerdi Kiriyool)

515 Hyde Park Ave
Roslindale, MA
(617) 635-8040
(Ku gargaar Ingiriisi, & Isbanish, Keebfeerdi Kiriyool, Hayshi Kiriyool, Faransiis)

Xiliga Diiwaangelinta culus: Xarumada FRC maalin walba waxay furan yihiin min 9:00 aroorti-5:00 galabti
Wac xarumada FRC xaga warar kale ee saacado dheeraad ah ee shaqada.

Wixi xog soo kororta, ka booqo www.bostonpublicschools.org, ama wac Xarrunta Waxtarmada Qoyska ee DDB midkood, ama isticmaal xogta khadka Shintiriska Xanaanada ee (617) 63LEARN.

Xaanshida #2

Lambarada Muhimka ah ee DDB & Xogta Asalka ah

- Lamabarada Rugta DDB (617) 635-9000
- " website"- ka DDB: www.bostonpublicschools.org
- Khadka Diiran ee DDB (Agost iyo Sebtembar): (617) 635-9046
- Waxbarashada Gaarka ah: (617) 635-8599
- Gaadiidka: (617) 635-9520
- Waxbarashada Ka Duwan: (617) 635-8035
- Barteysha Af Ingiriisiga (ELL): (617) 635-9435
- Adeegyada Cuntada iyo Nafaqaynta (617) 635-9144
- Unuga Ardayda Hoyga La': (617) 635-8037
- Waaxda Waqtiga Barasho Fidsan, Dugsi Kadlb/Adeegyo: (617) 635-1578
- Gudiga Dugsiyada Boston: (617) 635-9014

DDB Xarumada Waxtarmada Qoyska (FRCs):

1216 Dorchester Ave Dorchester, MA **(617) 635-8015** (gargaarku waa Ingiriisi, Isbanish Bortuqiis, Shiine,i Keebfeerdi Kiriyool, Faransiis & Fiyatnamiis)	55 Malcolm X Blvd. Roxbury, MA **(617) 635-9010** (gargaarku waa Ingiriisi, Isbanish,Shiine, Giriig, Carabi, Somaali, Bortuqiis, Fiyanamiis, Faransiis, Hayshi, Kiriyool & Keebfeerdi Kiriyool	515 Hyde Park Ave Roslindale, MA **(617) 635-8040** (gargaarku waa Ingiriisi, Isbanish, Keebfeerdi Kiriyool, Hayshi Kiriyool & Faransiis)

Agabyada Kale:

- **Khadka Xogta Shintiriska Xanaanada:** (617) 63LEARN
- **Shintiriska "website"-ka**: www.countdowntokindergarten.org
- **Golaha Waalidka Magaalaweynta**: (617) 635-9210
- **Xulashada Daryeelka Caruurta Boston** (khiyaaro dheeraad ah ee K0-K2): (617) 348-6641
- **Golayaasha Latalinta Waalidka Laba-luqadlaha**: (617) 635-8339
- **Shebekada Maamulka Waalidka Boston** (617) 373-5922
- **BOSTNET** (agabka baranaamijayada Xogta Dugsi kahor iyo kadib (617) 426-8288
- **BOSTNavigator www.bostnavigator.org** waa meesha laga helo barnaamijka Waqtiga ka Baxsan Dusiga ee magaalada Boston
- **Qoraalada Muhimka ah ee DDB** (laga helo Xarumada Waxtarmada Qoyska ama "online"): *"Isbaridda Dugsiyada Dadweynaha Boston"* (wuxu sharxaa dugsi kasta ee DDB) iyo *"Hagaha Dugsiyada Dadweynaha Boston ee Qoysaska & Ardayda"*

(soo rog wixi xog dheeraad ah)

WARAR ASALI AH IYO SHURUUDAHA LAGA OGAANAYO

DDB: waxay u taagan tahay Dugsiyada Dadweynaha Boston.

Aaga Diiwaangelinta: Boston waxay u qaybsan tahay aagag ku saabsan meelaynta ardayda: Aagaga Bari, Waqooyi iyo Galbeed. Qoysaska ardayda dugiyada hoose waxay ka xulan karaan dugsiyada ku yaal aagooda isqorida dugsi iyo/ama aag laga talaabo (cross-zone) waa aaga lugaynta ee guriga ardayga, iyadaan loo eegin aaga ay degan yihiin. Waxay kale ay xulan karaan sadexda dugsi K-8 ee magaalowaeynta ka dhexeeya.

Aaga Lugaynta: Dugiyada ku yaal "aaga lugaynta" waa kuwa ilaa hal mayl hoygaaga u jira. Boqolkiiba konton kuraasta waxa loo kaydiyaa ardayda aaga lugaynta dugsi u jira.

- Booqo www.bostonpublicschools.org ama wac Xarunta Waxtarmada Qoyska sidaad u ogaatid dugsiyada ilmahaagu u qalmo in la qoro, oo ay ku jiraan liiska aagaaga lugayntu.

DDB Dugsiyada Waxtarmada Qoysaaka (FRCs): Shaqaalaha sadexda xarumood waxay kugu caawin karaan xulashada dugsi iyo diiwaangelinta dugsi. Fiiri horaanta xaanshidan xagga luqadaha xarun kasta lagaga hadlo.

K2: Kanu waa maalin buuxda (6-saac) ee xaananada caruurta da'doodu tahay 5 ilaa Sebtemar 1. DDB waxay ugu balan qaadayaan kursi arday kasta ee la qorayo K2.

K1: DDB way balaarinayaan barnaamijyada xanaanada ee ilmaha afar-jirka ah (lana dhaho K1). Afartii sano ee la soo dhaafay, waxa la furay 84 qolfasal cusub oo leh 1,900 kursi. Hase ahaatee, kuraasta barnaamijyadan weli waa kooban yihiin lagumana balan qaadi karo meelaynta ardayda K1.

K0: Tirada kuraasta aad bay u yar yihiin u banaan caruurta noqonaysa 3 sano Septemar 1 lana dhaho K0). Kuraastan badankooda waxa buuxinaya ardayda waxbarashada gaarka ah ama kuwa walaalahood dugsiga ku jiraan. Qiimaynta ciyaalka waxbarashada gaarka ah, waxad la xiriirtaa DDB qaybta Adeegyada Midaysan ee Ardayda ee tel. # t (617) 635-7800.

- Xussunow maalin dugsiyeedku waa 6 saacadood oo keliya markaas waa inaad ogaataa in barnaamijku qaabilayo baahidaada waana inaad hubisaa inaad qorshe dambe oo dugsi kadib ama daryeel u hayso ilmahaaga, maadaama aan kuraasta marna loogu balan qaadiayn K0 iyo K1, dugsiyada badankooduna ma siiyaan da'ahan adeegyada dugsi kadib ee rugta dugsi. Liisaska dugsiyada dugsi kahor ama Bilaw Dugsi (Head Start), ay la socoto sidaad mucaawano lacageed u heli lahayd, waxad wacdaa Xulashooyinka Daryeelka Caruurta (Child Care Choices) Boston ee (617) 348-6641.

Xarumada Waxbarashada Hore (EECs) iyo Xarumada Waxbarida Kowaad (ELCs): Barnaamijyada DDB waxay siiyaan caruurta K0 ama K1 ilaa fasalka 1aad oo ay ku jiraan daryeel bilaash ah ee dugsi kahor ama kadib. Kuraasta xarumadani badanaaba way buux samaan doorka kowaad ee diiwangelinta (Janaayo 4 – Febraayo 1).

Waqtiga Sahaminta Dugsiga (School Preview Time - SPT): Tani waa xilliga min Noofembar ilaa Janaayo marka Dugsiyada Dadweynaha Boston kugu casuumaan inaad fiirisid waxa ay bixiyaann, intaadan ilmahaaga dugsi qorin. Waxad ka heli kartaa kaltan xarun "FRC" kasta, ama maktabad laga bilaabo Oktoobar aakhirkeeda ama booqo www.countdowntokindergarten.org.

Dugsiyada Tijaabo (Pilot Schools): Qaaybtan ka mid ah DDB, waxay dugsiyadan dadweynuhu ku cawiyaan waalidka, macalimiinta iyo maamuleyaasha inay tijaabiyaan istaraatijado cusub oo waxbarasho siday ula qaybsadaan dugsiyo kale.

Dugsiyada Ansaxan (Charter Schools): Dugsiyadan daweynuhu kama mid aha habka DDB. Waxa kormeera Waaxda Waxbarashada gobolka waxana bilaabay waalidka, macalimiinta, iyo ama hay'adaha beelaha. Xaga liiska ama xog dheeraad ah, wac (781) 338-3227.

Xaanshida #3

Xulashada Dugsiyada:
Xaanshi Talagelyo (A Tip Sheet)

Markaad qoraysid caruurta xanaanada, xaasaska Boston waxay ka xulan karaan dhawr dugsi. Sida caadiga ah, qoysku wuxu ka xulan karan dugsi ku yaal aagooda, dugsiyo ku yaal ilaa hal mayl meel u jirta gurigooda (oo aagooda ku jira ama ka baxsan), ama dugsiyada liiska magaalweynta. Waxad booqataa www.bostonpublicschools.org ama wac DDB Xarumada Waxtarmada Qoyska midkood xagga dugiyada ilmahaagu u qalmo.

TALO: Dugsi kastaa wax u gooni ah ayuu bixiyaa. Ka feker baahiyaha ilmahaaga iyo qoyskaaga, sida:

- *Rugta*
- *Ballaca dugsiga* (dugsiyada hoose waa 100 ilaa 900 arday) *iyo tirada fasalada* (qaarkood waa ilaa fasalka 5^{aad}, kuwana waa ilaa fasalka 8^{aad})
- *Saacadaha* (inta badan waa min 8:30 aroor ilaa 2:30 galab, ama 9:30 aroor ilaato 3:30 galab)
- *Barnaamijyada dugsi kahor ama kadib* (dugsi kastaa rugtiisuu ku leeyahay laakin da'da ardayda gelaysa ayaa kala duwan)
- *Diiwaangelinta Guud* (Waa maxay noocyada qalabka bandhigan? Sidee ilmuhu ula caamilaan macalimiinta iyo shaqaalaha?)
- *Waxyaabaha gaarka ah/Kobcin ("Specialties"/enrichment*) (Shaqaalaha dugsigu ma fidiyaan fanka, muusiko, dabaal, jirdhis kale, riwaayado, luqado?)
- *Dhismeyaal Nafaxaad-"Facilities*" (Waa sidee nadaafadu? Ma jirtaa barxad lagu cayaaro, qol jimnaastiko, maktabad, masrax, ama maqaayad cunto?
- *Nidaam Lebis –"Uniform policy"* (dugsiyadu way ka codbixiyaan nidaamka lebiska; sida darteed, qaar waa leeyihiin qaarna ma leh)
- *Qaabka waxbaridda iyo manhajka (Learning style and curriculum)*
- *Barnaamaijyada qaabka waxbarashada gaarka ah iyo luqada*
- *Tirooyinka imtixaanka la keeno*
- *Noocyada ardayda iyo shaqaalaha*
- *Anshaxa iyo qaabka nololeed*

TALO: Waxad dugsiyada u fiirin kartaa siyaabo kala duwan:

- **Sida keliya ee ugu wacan waa adigoo booqda dugsiyada**
- Dugsi kasta ka akhriso buuga *"Introducing the Boston Public Schools."*
- Waxad tagtaa Carwada Dugsiyada ee DDB bisha Oktoobar 27-deeda laguna dhigayo Xarunta Cayaaraha Reggie Lewis sidaad ula hadasho shaqaalaha dugsiyo badan ka socda isla markaas.
- La hadal shaqaalaha Xarumada Waxtarmada Qoyska.
- Booqo "website"-ka DDB: www.bostonpublicschools.org.

(soo rog sidaad u hesho talooyin kale)

TALO: **Noofambar 5 ilaa Janaayo 18 waa Waqtiga Sahaminta Dugsiyada (School Preview Time - SPT), oo ah marka dugsi kastaa ku casuumo xaflado qoysaska danaynaya**. Kormeer ku samee, macalimiinta la kulan, soo fiiri fasalada lana kulan xaasa kale. Ka soo qaado kaltanada "SPT" maktabadaha dhan, xarumada beelaha iyo Xarumada Waxtarmada Qoysaska DDB, ama adoo booqanaya **www.countdowntokindergarten.org**.

TALO: **Magalaweynta Boston iyo kuwa kaloo dad shaqo geliyaa waxay waqti siiyaan ayan lacagta ka goosan dadka booqanaya Dugsiyada Dadweynah Boston** maalinta shaqada si aad u soo aragto sida dugsiyadu u shaqeeyaa. Warso cidaad u shaqayso.

TALO: **Xusuunow Boston waxay istimaashaa qorshe diiwaangelin xulasho xakamaysan (controlled choice assignment plan)***, iyadoo diiwaangelinta lagu sameeyo kombiyuutar. Fursadda ugu wacan sidaad u hesho xulashadaada mid ka mid ah:

- ✓ Samee diiwaangelinta xilliga kowaad (**Janaayo 4 – Febraayo 1**), waqtiga loogu tala galay kaltanka magacaaga daambe. Booqo **www.bostonpublicschools.org** ama wac Xarunta Waxtarmada Qoyska sidaad kaltanka u heshid.
- ✓ **Xulo ugu yaraan <u>shan</u> dugsi aad rabto in ilmahaagu galo (wixi ka badanina ka sii wacan).** Isugu xeji sidaad u kala jeceshahay inaad u hesho – xulashada kowaad oo ah taad u jecshahay, xulashada labaad oo ah taada labaad, iwm.
- ✓ Kahor intaadan xulashadaada dugsiyada arjiga isugu xejin, ka feker shantan arrimood:

1. ***Sidee baa dugsiga loo jecel yahay?*** Hadba sida dugsi dad badan u jecel yihiin, waa yaraanaysaa fursadda aad kursi uga heli kartaa. Dad ka warayso "macdanta dahsoon" ee habka dugsiyada.
2. ***Dugsigu ma yahay mid aagaga looga lugeeyo****? Boqolkiiba konto kuraasta waxa la siiyaa qoysaska ku nool meel looga lugayn karo. Waxad fursad wacan ka heli kartaa gelitaanka dugsi ah aaga lugayntaada. Xusuusnow inaad dalban karto dugsi kasta oo ilaa hal mayl u jira cinwaanka gurigaaga, xataa hadii uusan ku jirin aaga dugsiyadaada.
3. ***Ma jiraan barnaamijyo K1 ah (waa kuwa jira 4- sano) dugsiga?*** (Ciyaalka hore ugu jirey dugsiga waxay u gudbayaan sare oo waxay qaadanayaan kuraasta K2 badankooda ee shan jir-rada)
4. ***Dugsigu ma filayaa in kuwo walaalahood ku jiraan oo badani soo codsanayaan dugsiga sanadka soo socdar?*** (Walaaluhu iyagaa tixgelinta kowaad leh inay helaan kuraasta madhan, marka weydii maaulaha wuxu filayo).
5. ***Dugsigu ma siinayaa ilmahaaga da'diisa daryeelka dugsi kahor ama kadib?*** Dugsiyada qaarkood ma bixiyaan barnaamij rugta dugsiga ah; qaar kalena ma bilaabaan inta ka horaysa K2 ama fasalaka kowaad. Waa inaad hubisaa intaadan dugsi xulan.

TALO: **<u>Hadaad ka weydo kursi dugsiyada aad codsatay, waa inaad soo noqotaa oo aad ka samaysaa xulashooyin cusub</u>** dugsiyada weli kuraasi ka banaan tahay. Codsashada aad samayso xilliga kowaad, adoo shan iyo wax ka badan oo dugsi kala xulanaya, kuna darsanaya dugsiyada aan aad loo aqoon waxay sii badinaysaa fursadda aad kursi uga helayso dugsiyada aad xulatay. Xusuusnaw in xanaanada K0 iyo K1 ay kuraastoodu koban tahay.

*Shaqaalaha Xarunta Waxtarmada Qoyska ayaa kaaga jawaabi kara su'aalaha ku saabsan habka xulashada xakamaysan iyo dugsiyada ku yaal aaga lugayntaada.

DDB Xarumdada Waxtarmada Qoyska:

1216 Dorchester Ave Dorchester, MA **(617) 635-8015**	55 Malcolm X Blvd. Roxbury, MA **(617) 635-9010**	515 Hyde Park Ave Roslindale, MA **(617) 635-8040**

Xagga cusboonaynta xogta a, booqo, www.bostonpublicschools.org, booqo ama wac Xarun Waxtarmada Qoyska, ama isticmaal khadka xogta Shintiriska ee (617) 63LEARN.

Xaanshdt #4

BOOQASHADA DUGSIYADA:
Xaanshi Shaqo

Isku day inaad xaanshidan isticmaasho sidaad ula socoto waxaad ka baran karto dugsiyada, adoo buuxinaya oo keliya maadooyinka kuu muhimka ah adoo samaynay inta nuqul ee ugu badan aad rabto.

Magaca Dugsi: _____
Meesha: _____
Tirada Fasalada (K-5 ama K-8) **iyo # qolfasalka fasal kasta:**

_____
Saacadaha dugsi ee sanadka soo socda:

_____
Wadarta # ardayda inta fasalka ku jirta (imisa arday qaangaar ah ayaa ku jira fasal kasta, lagu daro macalimiinta, gacanyarta, iyo kuwa caawiya?):

_____

* * * * *

Dhismayaalka (barxad cayaareed, qol jirdhis, maqaaxi cunto, maktabad, berked dabaasha): _____
_____
Muqaal dugsi iyo jawi guud: _____
_____

* * * * *

Manhajka: _____
_____
Duruus khaas u ah/kobcin (muusiko, fan, saaynis, waxbarasho jirdhis?):
_____
Tirooyinka imtixaan la keeno_____

* * * * *

Barnaamijyada dugsi kahor iyo kadib: _____
_____
Fursadaha kaqaybgalka waalidka: _____
_____
Kala duwanaanata ardayda iyo shaqaalaha _____
_____

* * * * *

Qoraalo ku sabsan macailimiinta, maamulaha iyo shaqaalaha kale:
_____

Qoraalo Dheeraad ah (nidaamka lebiska, habka anshaxa, arimaha kale ee ku khuseeya): _____

Xaanshida #5

DIIWAANGELINTA CARUURTA XANAANADA EE DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON: Dulucda Asaasiga ah

Kuma/Tuma?

Hadii ilmahaagu noqonayao 5 jir ilaa Sebtembar 1, 2008, waxa laguugu balan qaadayaa kursi xanaano, la dhaho K2. (Waxa sii badanaya kuraasta caruurta xanaanada ee K1 ee noqon doona 4 sano Sebtembar 1. Kuraas tiro kooban ayaa loo helayaa caruurta K0 ee da'doodu noqon doonto 3 sano Sebtembar 1. Maadaama kuraasta K1 iyo K0 kooban tahay laguma ballan qaadi karo.)

Goorma?

Xilliga kowaad ee diiwaangelintu waa min Janaayo 4-Febraayo 1, iyadoo la raacayo kaltanka alif-beetada (A-I wiiga ugu horeeya iyo wax la mid ah). Sidaas awgeed diiwaangeli wareega xilligan sidaad u hesho fursadda ugu wacan dugsiyada aad rabto. Wac lambarada hoose sidaad u ogaato taariikhda runta ah iyo waqtiyada saacadaha galabti.

Meelma?

Ka diiwaan geli Xarumada Waxtarmada Qoyska ee DDB midkood:

1216 Dorchester Ave	55 Malcolm X Blvd.	515 Hyde Park Ave
Dorchester, MA	Roxbury, MA	Roslindale, MA
(617) 635-8015	(617) 635-9010	(617) 635-8040

Meelaha kale ee diiwaangelinta, booqo www.bostonpublicschools.org.

Sidee?

1. **Soo ogow dugsiyada ilmahaagu codsan karo** adoo booqanaya "website"-ka Xarumada kor ku xusan midkood ama adoo booqanaya "website"-ka: www.bostonpublicschools.org ama wacaya Xarumada Waxtarmada kor ku xusan midkood.
2. **Noofembar 5 - Janaayo 18, Waqtiga Sahaminta Dugsi (SPT), soo booqo dugsiyada sidaad u go'aansato dugsiyada ugu haboon qoyskaaga.** Ka hel kaltanka Waqtiga Horufiirin Dugsi "SPT" www.countdowntokindergarten.org ama maktabadda xaafadaada, xarunta beesha ama Xarunta Waxtarmada Qoyska FRC. (Ka akhri xogta Shintiriska Xanaanada xaanshiyaha #3 iyo #4 xagga wararka xulashada dugsiyada.)
3. **Ka xulo ugu yaraan shan dugsi** arjiga codsigaaga; xataa in ka badani ka wacan. Ku darso dugsiyada aan aad loo aqoon xusuusnawna aaga lugaynta iyo qaalibnaanta walaalaha ee fursadda ugu wacan helitaanka dugsiga liiskaaga.
4. **Marka diiwaangelinta, soo qaado waxyaabaha soo socda**:
   - ✓ Warqadda dhalasho ee asalka ah ama dhuldhaafiyaha ilmahaaga.
   - ✓ Sadex cadaymood ee cinwaanka gurigaa (fiiri bogga kale ee liiska la ansixiyey)
   - ✓ Arjiga dhakhtarka ilmahaaga oo cadaynaya talaalada (fiiri dhinaca kale ee liiska)

Xagga taariikhaha diiwaangelinta sanadkan iyo xogaha kalee cusub, booqo www.bostonpublicschools.org, booqo ama wac Xarun Waxtarmada Qoyska ee DDB, ama isticmaal khadka xogta Shintiriska ee: (617) 63LEARN.

DDB Nidaamka Degenaanshaha

Codsadeyaalka idil waa inay keensadaan **sadex cadaymood oo hadda ah ee liiska hoos ku xusan**. Warqaduhu waa inay ahaadaan kuwo daabacan oo wata magaca iyo cinwaanka waalidka ama koriyaha waana in la keenaa marka la samaynayo diiwaangelinta.

Nidaamkan degenaanshuhu ma khusayso ardayda hoylaawe ah. Hadaad u haysato in wadcigaaga nololeed kaa dhigayo hoylaawe ama siyaabo kale aan hagaagsanayn noloshu kugu tahay, fadlan kala wixi xog dheeraad ah tasho shaqaalaha Xarnta Waxatarmada Qoyskaf.

Codsadeyaalka idil waa **inay hal caddayn ka keenaan sadexda qaybood midkiiba:**

Udubka A	Udubka B	Udubka C
• Nuqul lahaansho guri iyo xaanshi bixinta hafto ee ugu dambaysey • Nuqulka qandaraas kirayn (ay ku jirto kuwa heshiisyada "BHA" iyo "HUD") **IYO** bixinta kiradii ugu dambaysey • Maragfur (affidavit) sharciyaysan ee hantiilaha guri oo cadaynaya kiraynta **IYO** bixinta kiradii ugu dambaysey Sidaad u hesho arjiga Maragfurka tag: www.bostonpublic schools.org/residency/residency _ affidavit. pdf • Heshiis "Section 8"	**Bixinta biil shidaal (utility bill) ee taariikhda 60 casho, ay ka mid yihiin:** • Biil gaas • Biil saliid • Biil Koronto • Biil telefan guri (Telefanka gacanta lama ogola) • Biil keebal telefishan	• Leesan dareewal sharci ah • Diiwaangelin baabuur sharci ah • Aqoonsi sawiran ee sharci ah oo Massachusetts • Dhuldhaafiye sharci ah **Taariikhaysan ilaa sanad:** • Arji W-2 • Biil cashuur Excise (baabuur) • Biil cashuur hanti **Taariikhaysan 60 casho:** • Warqad hay'ad dawladeed ee muctaraf ah • Dabada warqad mushahar lagu qaatay • Xisaabcelin banki ama "credit card"

** Koriimada sharciyaysani waxay u baahan tahay warqado dheeraad ah ee maxkamad ama hay'ad (legal guardianship requires additional documentation from a court or agency).*
Wixi warar dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka degenaanshaha, soo wac 617.635.9014.

Shuruudaha Talaalka

Kuwa u codsanaya xanaanada K2 waa inay keenaan cadaynta talaaladan waqtiga diiwaangeltat:

- 3 taalaal ee Hep B (cagarshow)
- 4 talaal Polio (Dabayl)
- 5 talaal DtaP/DTP (xiiqdheer)
- 2 talaal MMR* (jadeeco)
- 1 talaal Varicella (chicken pox)- busbus

**Codsiyada xanaanada K1 waxa loo baahan yahay oo keliya hal "MMR"*

Sheet #6

DUGSIGA MAALIN CAADI AH

6-saacadood ee maalinta dugsiga xanaanada ee Dugsiyada Dadweynaha Boston, waxabarashada waxa lagu sameeyaa hawlo kala jaad ah. Shaqadanu waa ku kala duwan tahay dugsi ilaa dugsi, laakin maalinta caadiga ahi inta badan waa sidatan:

Aroorti:

- waxa lagu bilaabaa kulan heeso, tirinta inta caruur joogta, ka hadalka hawada, siyaabo kale oo tirooyinka looga hadlo, tababar sida koox ahaan loo wada hadlo, iyo doodaha fikradaha;
- waxa ku jira laba saac ee “dhismo akhri/qorid” (literacy block) iyadoo ardaydu kaga qayb gelayso kooxo yaryar ama balaaran dhismaha xirfadaha qorida iyo akhriga. (Dhamaadka sanadka ardaydu waxay samaynayaan buugag ay iska leeyihiin).

Galabti:

- waxa ku jira waqti kala duwan ee caruurtu kala dooran karto xarumo ama saldhigyo ay ku cayaaraan waxna ku bartaan;
- waqti hawlo iyo cayaaro xisaabeed si ay caruurtu u bartaan fikradaha asalka ah iyo tirooyinka labalabo ama tobanaadyada.

Maalinta idil:

- caruurtu waxay la joogi karaan khabiir u dhiga fanka, xirfadaha kombiyuutarka, muusiko ama maadooyin kale;
- ardaydu waxay tegi karaan maktabadda dugsiga, ama qolfasalada kale siday u bartaan sayniska ama duruusta dhaqameed , ama dibadda bay u bixi karaan iyagoo la socda macalin caafimaad oo jimicsi sameeyaan;
- waqti nasasho ayaa jira oo la galo jimicsi iyo cayaar;

Caruurta idil waxay leeyihiin waqti qado; dugsiyada qaarkoodna waxay qorshaha ku darsadaan waqti cunto fudud.

Xanaanada K1: caruurtu waxay ku bilaabaan shir kooxeed uu ku jiro salaan iyo usheegid waxa jiri doona waqtiga dhexe. Caruurtu waxay leeyihiin hal saac oo waqti dhexe ah - waa xili ay samayn karaan kala doorasho waxay samayn doonaan. Waxa kalee maalinta ku jira waqti sheeko iyo waqti heeso. Fasaladu waxay waqti ku qaataan iyagoo kooxo yaryar ah inay xooga saaraan xisaabta iyo fursadaha akhri/qorida. Waxay kalee helaan waqti nasasho, fasax ah, qado iyo cunto fudud.

(soo rog wixi warar dheeraad ah)

Ma Og Tahay?

Kombiyuutarada:

Dugsiyada Boston oo dhan waxay leeyihiin shaybaaryo kombiyuutar waxayna ku xiran yihiin “Internet”-ka. Dugsiyo xanaanada ah oo badanina waxa qolfasalka u yaal kombiyuutaro.

Fananka:

Nidaamka Dugsiyada Boston ee “Waxbarashada Fananka” (Arts in Education) waxa laga rabaa dugsiyada hoose inay siiyaan caruurta ugu yaraan 90 saac oo fananka sanad kasta.

- Dugsiyada (waalidku wax ka qabto) waxay go’aamiyaan waxa y bixiyaan: qoobcayaar, muusik, masraxa, fanaka la daawado.
- Ardaydu waxay wax ka baran karaan dadyaw kala duwan xagga fanka sanadka gudihiisa: macalinka qolfasalka, macalin fanka oo gaar ah, fanaaniin soo siyaarta, iyo shaqaalaha fanka ee hay’adaha beesha ee bixiya safarada gaagaaban.

Barxadaha cayaarta iyo Waxbarashada Jirdhiska (P.E.):

Dugsi kastaa wuxu maalintii leeyahay xilli loo baxo jimicsi; dugsiyada qaarkood waxay leeyihiin barnaamij rasmi ah ee waxbarashada jirdhiska.

- Some elementary schools have swimming pools; others use pools in the community.
- Iyadoo laga maal geliyo Mashruuca Barxad-dugsiyada Boston (Boston Schoolyards Initiative), in ka badan 60 dugsiyada hoose ayaa leh barxadaha cayaaraha qaar badanna waa loo soo wadaa

Cuntooyinka:

Dugsiyadu waxay bixiyaan quraac iyo qado maalin kasta, oo caruurta idil la siiyo.

- Sidaad u ogaatid inaad u qalanto cunto bilaash ah ama qiime jaban, wac Adeegyada Cuntada ee Waaxda DDB: (617) 635-9144.
- Caruurtu waxay kale keensan karaan cuntadooda.

Tirada Fasalka:

- Waxbarashada caadiga ah ee qolfasalada xanaanada K2 waxay leeyihiin hal macalin ee waqti buuxa iyo ilaa 22 caruur ah. Qolfasalada K2 oo dhan waxay leeyihiin macalin gacanyare ah oo waqti dhiman shaqeeya, arday macalinimo barta, ama caawiye ka socda barnaamij beeleed. Dugsiyada agaasimaha guud waxa ku jira arday ka tiro yar, oo fasalkii yahay 20 arday.
- Waxbarashada caadiga ah ee qolfasalada xanaanada K1 waxay leeyihiin hal macalin ee waqti buuxa, hal macalin gacayare ah ee waqti buuxa ah iyo ilaa 22 caruur ah.
- Fasalada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa iskujirka ahba (waa kuwa laysku daro ardayda waxbarashada caadiga ah iyo kuwa gaarka ah) tirada ardayda fasalku waa ka yar yihiin.

Kaqaybgalka Qoyska:

Waalidiinta waxa lagu casuumaa inay siyaabo badan uga qayb galaan. Doorka ugu weyni waa in loo diro fariin taabadug ah – ha ogaado ilmahaagu sida dugsigu ugu muhim yahay qoyskiina!

- Ardayda xanaanada waxa la siiyaa shaqaguri caadi ah oo waalidku ka caawin karo, sida wada akhriga iyo cayaaraha xisaabta.
- Macalin kastaa wuxu leeyaha waqti usbuuceed oo uu la hadli karo waalidka, markaas ha ka walaacin inaad wacdo oo ballan ka codsato. Waxa kale lagugu casuumayaa shirarka waalidka-macaliminta sidaad u fiiriso shaqada ilmahaaga oo su’aalo u weydiiso.
- Waalidku waa ku tadawici karaan hawsha fasalka, raacida safarada gaban, ama inay ka mid noqdaan xafladaha dugsiga.
- Dugsiyo badani waxay leeyihiin bishiiba shirka “golaha waalidka” (parent council) oo u furan qoysaska idil, oo leh “golaha rugta dugsi” (school site council) oo laga soo doorto waalidka iyo macalimiinta oo kormeera go’aanada dugsiga qaarkood.
- Hadaad wax su’aala ah ama welwel ka qabto waxbarashada ilmahaaga, la hadal macalinka ilmahaagaTalaabada labaad, hadaad weli su’aalo qabto, waa inaad la hadashaa maamulaha. Dhexdhexaadiyaha DDB (BPS “ombudsperson”) wuxu la shaqeeyaa xafiiska dhexe wuuna ku caawin karaa hadad weli welwel qabto. Wac (617) 635-6995.

Xaanshida #7

BARNAAMIJYADA DUGSI KAHOR IYO KADIB

Su'aal: ***Xagee ilmahayga ugu diri karaa dugsi kahor iyo kadib?***
Jawaab: Dugsiyada hoose ee Boston kuwo badan baa barnaamijyo ku leh sarta gudaheeda, oo marar qaarkood dugsigu maamulo marmarna hay'ad iskaashi beesha la leeyahay. Ogow barnaamijyada qaarbaa loo bilaaba 5 jirka, qaarna markay 6 sano jiraan. Waxa jira in ka badan 200 barnaamij oo ka socda meelo beeleed ee magaalada gudaheeda ay maamulaan laamaha YMCA, kaniisadaha iyo meelaha kale diineed, Xarumada Beelaha, Naadiyada Wiilasha iyo Hablaha, mashaariicda guryaha, iyo xarumada daryeelka caruurta.

Su'aal: ***Saacadahee baa barnaamijyada la galaa?***
Jawaab: Barnaamijyada dugsi kahor waxay furan yihiin hal ama laba saac intaan dugsi maalmeedka la (oo ah 8:30 aroor dugsiyada Boston qaarkood iyo 9:30 aroortii kuwa kale). Barnaamijyada dugsi kadib waxa la furaa marka dugsi maalmeedku dhamaado (2:30 ama 3:30) ilaa 5:30 ama 6:00 galabtii.

Su'aal: ***Waa intee qiimaha barnaamijyadu?***
Jawaab: Qiimaha waxay ku kala duwan yihiin rug ahaan iyo cidda bixinaysa, laakin badankoodu waxay leeyihiin qiime kala sareeya ama waxay qaataan foojar. Sidaad u ogaatid uqalanka caawinaad lacageed, waxad gacan weydiisan kartaa barnaamijka ama wac Xulashooyinka Daryeelka Ilmaha Boston (Child Care Choices of Boston) ee (617) 348-6641.

Su'aal: ***Maxay caruurtu ku sameeyaan barnaamijyadan?***
Jawaab: Tbarnaamijyadu aad bay kala duwan yihiin. Qaar waxay leeyihiin xoojin gaar ah, sida ku caawinta shaqaguriga ama fananka ama isboortiga. Qaar kalena waxa ku jira xulashooyin balaaran.

Su'aal: ***Waa sidee hadaan rabo xanaanada dugsi kadib oo keliya dhawr casho wiigii?***
Jawaab: Barnaamijyada badankoodu waxay u diyaar yihiin inay u debecsan yihiin maalmaha, waxse ay door bidaan ardayda maalin kasta imanaya ama waxay ka dalbi karaan kharash dheeraad ah ardayda dhawr maalmood yimaada wiigii.

(soo rog wixi warar dheeraad ah)

Su'aal: ***Gaadiidka ka warran?***

Jawaab: Sida caadiga ah waalidku waxay u baahdaan inay habeeyaan siday ilmaha u geyn lahaayeen barnaamijyada dugsi kahor ugana keeni lahaayeen barnaamijyada dugsi kadib, in kastoo meelo aan badnayn gaadiid la bixiyo. Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay bixiyaan gaadiid "ka duwan" (iyadoo ilmaha lagu dejiyo barnaamij dugsi kadib meeshii guriga laga geyn lahaa) hadii codsigaagu shuruudaha qaarkood waafaqo. (Fiiri xaanshida #8.)

Sidaad u heshid arjiga "Gadiid Ka Duwan" (Alternative Transportation) booqo DDB ama Xarumada Waxtarmada Qoyska (BPS Family Resource Centers) midkood:

Aaga Bari	**Aaga Waqooyi**	**Aaga Galbeed**
1216 Dorchester Ave	55 Malcolm X Blvd.	515 Hyde Park Ave
Dorchester, MA	Roxbury, MA	Roslindale, MA
(617) 635-8015	**(617) 635-9010**	**(617) 635-8040**

Su'aal: ***Xagee ka heli karaa warar dheeraad ah ee barnaamijyada dugsi kahor ama dugsi kadib?***

Jawaab: Wac oo gacan weydiiso Xarumada Waxtarmada Qoyska (ee kore). Hagaha 2006-2007 ee Barnaamijyada Dugsiyada Boston Kahor iyo Kadib waxa laga helaa "BOSTNET" ee maktabadaha idil iyo Xarumada Waxtarmada Qoyska ama "on-line"-ka www.bostnet.org. Xulashooyinka Daryeelka Ilmaha Boston (Child Care Choices of Boston) iyana waxay ku caawin karaan waalidka inay ka helaan barnaamijyada dugsi kahor & kadib haday galaan www.Masskidcare.net, ama khadka waalidka: 617-348-6641 (Isniin-Jimce 9:30-3:30), ama shirarka fool ka-foolka ah ee lataliyaha.

Taariikhaha diiwaangelinta sanadkan iyo warar kale cusuba, booqo t www.bostonpublicschools.org, booqo ama wac Xarun Waxtarmada Qoyska, ama isticmaal khadka wararka Shintiriska ee: (617) 63LEARN.

Xaanshida #8

GAADIIDKA

Su'aal: ***Yaa u qalma gaadiidka Dugsiyada Dadweynaha Bobston? Goormaan helayaa xogta baska ilmahayga?***

Jawaab: Hadii aad degen tahay hal may ama in ka badan dugsiga hoose ee ilmahaaga, waxad helaysaa bisha Agost warqad sheegaysa baska meesha joogsiga ilmahaaga iyo kaltankiisa. (Caruurta naafada ah ama duruufo caafimaad darro xun waxay u qalmaan gaadiid gooni ah. Wac Adeegyada Caafimadka DDB, 617-635-6788, ama Waxbarashada Gaark ah (Special Ed) ee, 617-635-8599.)

Su'aal: ***Ma ra'yi wacan baa in ilmaha da'dan ahi raacaan bas?***

Jawaab: Waa in qoys kastaa sameeyaa go'aankooda dabcan. Caruurta xanaanada qaarkooda, raacida baska dugsigu waa wax la yaab leh ay jecel yihiin oo tusaya siday u korayaan! Waalidka qaar baa gaariga daba dhiga baska maalinta kow ama laba, siday u arkaan waddada. Markaad hesho qorshaha baskaaga, xor baad u tahay wicidda waaxda gaadiidka sidaad u ogaato intuu basku qaato iyo inta caruur baska la raacaysa.

Su'aal: ***Xagee baa baskaygu is taagayaa?***

Jawaab: Ardayda badankooda raaca bas dugsi waxa laga qaadaa oo lagu dejiyaa koone meel u dhow gurigooda. Hadaad u haysato in joogsiga basku fog yahay ama laga gudbayo waddo khatar ah, la hadal maamulaha ama shaqaalaha Xarumada Waxtarmada Qoyska ee DDB ama wac Waaxda Gaadiidka.

Su'aal: ***Maxaa jira hadaan rabo in ilmahayga laga qaado ama lagu dejiyo meel aan gurigayga ahayn, sida guri awow ama ayeeyo, ama barnaamij dugsi kadib?***

Jawaab: Ka dalbo arjiga "Gadiidka ka duwan" (alternative transportation) maamulaha ama Xarumada Waxtarmada Qoyska midkood. Waxay qaadata 2-3 wiig inta laga shaqaynayo codsiga, iyadoo la ansixin doono hadii:

- Joogsiga baska aad codsatay ku yaal waddo jirta ee basku maro min ama ilaa guriga ama dugsiga; iyo
- Hadii baska meeli ka banaan tahay; iyo
- Hadaan waqtiga baska dalabka aan waqti kale ku kordhayn

* * *

Si lagaaga caawiyo su'aalaha gaadiidka wac:

- Waaxda Gaadiidka DDB: 617-635-9520
- Xarumada Waxtarmada Qoyska DDB: 617-635-8015, 617-635-9010, 617-635-8040
- Khadka diiran ee DDB (Agost iyo Sebtembar keliya): 617-635-9046

Xaanshida #9

ISUDIYAARINTA DUGSIGA:
Meelo la Tago iyo Waxyaabo la Sameeyo!

"Isudiyaarinta Dugsiga" waxay khusaysaa qoyska idil. Waa maxay siyaabaha ugu wacan aad ilmahaaga ku caawin karto isudiyaarin dugsi?

- **Ka dhig kuwo haysta nabadgelyo, caafimaad, & firfircooni!** (Fiiri xaanshida caafimaadka, #10.)
- **Ku dhiiri geli danahooda dabiiciga ah ee waxbarashada iyo wax ka ogaanta aduunka ku xeeran.** (Soo dhowee su'aalahooda. Wada hadla, wada akhriya, wada heesa oo wada cayaara!)
- **Ku caawi ilmahaaga barashada xirfadaha dhaqanka** (la qaybso shucuurta, dhegeysiga, iyo isu sheegidda waxad qabtaan).
- **Baro dugsiga ay geli doonaan.**

Caruurta gelaysa Dugsiyada Dadweynaha Boston waxa la siin karaa laba hadiyadood oo ka buuxa hawlo fanka waxbarashada qoyska si loo tijaabiyo sanadka ka horeeya intaad dugsi la gelin: sawirro dhaqdhaqaaqa iyo xaanshi taariikhda oo la dhaho"*Reading and Drawing your Way to Kindergarten" (Akhir oo Sawir Wadadaad u Marayso Xanaano).* Sidaad u ogaatid meesha iyo waqtiga labadaba la helo, booqo "website"-ka www.countdowntokindergarten.org ama (617) 63-LEARN. Ama oo kale, tijaabi hawlahan qiimaha jaban ama bilaashka ah ee caruurta yaryar ee Boston:

Maktabadda Dadweynaha Boston waxay leedahay 27 laamood iyo waxtareyaal:

- Filimyo dugsi kahor iyo saacado sheekoyin
- Xaflado gaar ah

Booqo www.bpl.org ama wac lambarkooda kowaad: (617) 536-5400.

Xarumada Dhalinta iyo Qoysaska Boston (42 meelood) bixiyana:

- Tababaro dabaal bilaash ah ama qiime jaban iyo dabaasha qoysaska
- Fasalo qoobcayaar iyo muusik iyo kooxo tartan cayaareed oo

Wac (617) 635-4920 sidaad u ogaato waxa laga bixiyo meesha kuugu dhow.

Xidhmooyinka Boston iyo Nafaxaadku waxay leeyihiin 287 Xidhmo & barxado cayaareed!

Waxay kalee sameeyaan:

- Casuumad Xafladaha, banaan baxyo, konjeertooyin iyo "ParkARTS" – waa hawlo bilaash ah sida samaynta indha-sarcaadka qosolka leh (puppet-making) iyo heeso la wada qaado ee lagu sameeyo xidhmooyinka xaafadaha
- Daawashada Balliga Raha ee Barxadda Dadweynaha Boston (Oversee Frog Pond on Boston Common) (baraf ku-dheelka jiilaalka iyo biyo-batalaqda kulaylaha – "skating in winter and wading in the summer")

Wac (617) 635-4505.

(soo rog xagga hawlo badan oo kale)

Kooxaha Wada Cayaara siday wax isulau Bartaan ee Shintiriska Xanaanada:

- Kooxo Wada Cayaara ee Waalid-Caruur oo bilaash ah ee caruurta da'doodu tahay 1, 2, iyo 3 iyo kuwa u fidiya daryeelka
- Meelahaas waxa ka mid ah Xarunta Barasha Kowaad (Early Learning Center – ELC) ee galbeed, Dugsiga/Akademiyada Lee, Dugsiyada Holmes, Kenny iyo Winship iyo Xarunta Beesha Tobin
- Kaalay Cayaar! Hees! Akhri! Sawir! Dhaqaaq! Qosol!

Booqo http:/www.countdowntokindergarten.org/ ama wac (617) 635-9656

Boston, Waaxda "MA Department of Conservation and Recreation" waxay maamushaa:

- 7 barxadaha barafka lagu sibiibixdo (skating rinks)
- Meelo dabaal, cayaarta teniska, xidhmooyin, iyo barxado cayaareed

Wac (617) 626-1250.

Matxafka Xaruurta (Children's Museum) wuxu bixiyaa:

- Meel Cayaareed (PlaySpace) ee caruurta yaryar, oo leh qol waalidku wax ku barto iyo meelo seminar ay ku galaan
- $1 baa lagu gala habeenada Jimcaha iyo warqado fasax bilaash ah ee maktabadaha

Booqo www.bostonkids.org or call (617) 426-8855.

Matxafka Saynisku (Museum of Science) wuxu leeyahay:

- Xarun Sahamineed (A Discovery Center) ee ciyaalka 6 sano ka yar
- Carwooyin xoolo iyo kuwa kaloo badan (Animal exhibits and much more)
- Warqado fasax bilaash ah ee maktabadaha

Booqo www.mos.org ama wac (617) 723-2500.

Matxafka Fanka Qurxoon (Museum of Fine Arts) wuxu marti geliyaa:

- Hawlaha "Meesha Qoyska" (Family Place) sida tartiibta ah loo qabtooo loo habeeyey in waalidka iyo ubadku wada sameeyaan.
- Sabtida iyo Axada laga bilaabo Oktoobar 6-eeda, 11 aroorti –4 galabti, waana caruurta da'doodu tahay 4 iyo wixi ka badan.

Booqo www.mfa.org ama wac (617) 369-3300

"New England Aquarium" wuxu maamulaa:

- Xarun hawlaha caruurta ee sheekooyin iyo farshaxan leh
- Berked dabaqyo badan ee kaluun, iyo shinbiraha "penguins", libaax badeedka (sea lions) iyo "otters"

Booqo www.neaq.org ama wac (617) 973-6563.

Matxafka Markabka "USS Constitution" wuxu bixiyaa:

- Gelitaan lacag la'aan ah (deeq aan badnayn waa la dhiiri geliyaa) xagga Markabka USS Constitution iyo Matxafka labadaba.
- Bandhiyo qoyska soo dhoweeya ee ku saabsan markabka iyo baxaaridii ka shaqayn jirtey.

Booqo http://www.ussconstitutionmuseum.org ama wac (617) 426-1812

Xidhmada duurjoogta – "Zoo New England" (ee Franklin Park) waxay leedahay:

- Barxad cayaaraha
- Kaynroobeed aay joogaan daayeerka gorilaha (gorillas)
- Libaaxyo, geriga, duurjoog kaloo badan, iyo xidhmo xayawaanka caruurtu korsato (children's petting zoo)

Booqo www.zoonewengland.org ama wac (617) 541-LION.

Waxad kalee wici kartaa **Xafiiska Duqa Magaalada ee Xafladaha Gaarka ah iyo Dalxiiska** ee (617) 635-3911 xagga konjeertooyinka bilaashka ah iyo carwooyinka magaalada ka socda ama booqo www.cityofboston.gov. Xaga **talooyinka hawlaha isudiyaarinta aad gurigaaga la samayn** karto ilmahaaga, booqo www.countdowntokindergarten.org

Xaanshida #10

ADEEGYADA CAAFIMAADKA DUGSIGA

(iyo talooyinka caafimaad iyo badbaadin)

XAQIIQO: ***Dugsi kasta ee Boston wuxu ugu yaraan leeyahay kaaliso waqtiga dhiman*** siday u samayso gurmad degdeg ah, u bixiso dawooyinka dhakhtaradu soo qoreen amay kaa caawiso cudurada joogtada ah

XAQIIQO: ***Waad la kulmi kartaa kaalisada dugsiga markaad hesho diiwaangelinta dugsiga.*** Tani waxay si gaar ah muhim ugu tahay hadii ilmahaagu uu qabo xaalad caafimaad ama jidheed. Sidaad ula kulanto kaalisada:

- Sanad dugsiyeedka, toos u wac dugsiga
- Waqtiga kulaylaha, wac Adeegyada Caafimaadka (617) 635-6788

TALO: Wax kastoo dhacaba, waxan kugu dhiiri gelinaynaa inaad barato kaalisadaada marka dugsigu bilaabmo. Sida shaqaalaha dugsiga idil, kaalisadu waa qof weyn oo muhim u ah nolosha ilmahaaga.

TALO: Waxad helaysaa xiriir degdeg ah iyo arjiyada caafimaadka ee dugsiga kadib in yar bilawga dugsiga ilmahaaga. Fadlan si degdeg ah u soo celi oo soo cusboonaysii hadii xogtaas wax iska bedelaan.

TALO: ***Hadii ilmahaagu si joogto ah ugu baahdo daaweyn intuu dugsiga joogo, waa inaad keensataa fasax (amar) dhakhtarkaaga ka socda.*** Marmar waxay qaadataa dhawr wiig sida ballan loo helo, markaas waqti wacan sii sidaad ilmahaaga ugu geyso dhakhtarka intaan dugsigu bilaabmin.

TALO: ***Ka cabbir aragga iyo maqalka ilmahaaga intaan dugsiga la bilaabin.*** Hadii ilmahaagu muraayado gashado, hubi inuu keensado/inay keensato dugsiga maalin kasta.

XUSUUSNOW: Hadii ilmahaagu jirrado ama xummad qaado, fadlan ha u soo dirin dugsiga. Way adag tahay inaad waxbarato markaad jirrato.

(soo rog sidaad u hesho talooyin caafimaad iyo badbaadin)

FAYO QABKU WAXBUU TARAA WAXBARASHADA!

1. Hubi in ilmahaagu leeyahay caymis caafimaad oo helo daryeel caafimaad joogto ah.

- Ilma kastaa wuxu u qalmaa caymis caafimaad. Wac Khadka Caafimaadka Duqa Magaalada ee (617) 534-5050 sidaad wax dheeraad ah u ogaatid.
- Hubi inaad sanadkiiba smayso kaltan lagu baaro caafimadka ilmaha. Hawtegin oo keliya dhakhtarka marka ilmuhu jirrado.

2. Ku dhaqan caadada caafimaad iyo badbaadin wacan ee guriga iyo qoyska. (Xusuusnow: caruurtu waxay ku daydaan waxa dadka waaweyni sameeyo!)

- Cuntada iyo Nafaqaynta: Si aad u caawiso kobcinta maskaxda iyo jirka, waxad isku daydaa cuntada fudud ee sonkortu ku yartahay, khudaar iyo cagaar badan, iyo cuntooyinka kaalshada leh.
  - Quraacdu waa cunto muhim ah. Xaqiiji in ilmahaagu Sidaad u caawiso in maskaxda iyo jirku u koraan, ku dhaqan cuntada sonkortu ku yar tahay, khudaar iyo midho badan, iyo cuntooyin kaalsiyam leh. quraacdo maalin kasta intaan dugsiga la bilaabin.
- Dhaqdhaqaaqa Jirka: Yaree daawashada TV –ga in ka badan 1 ama 2 saac maalintii, sameena jimicsi (lugayn, cayaaris kubad, kubood xarig, iwm.) joogto ahaan.
- Naso oo Seexo: Caruurta badankoodu waxay u baahan yihiin10-12 saac oo hurdo ah habeen kasta, in kastoo qaarkood in ka yar ama in ka badan u baahan yihiin. U deji waqti sariirta la galo ee ilmahaagu helo nasashada uu u baahan yahay/ay u baahan tahay. (Calaamad ku tusaysa in ilmahaagu helay hurdo wacan waa marka uu aroortii dhib ku noqon weyso toosiddu).
- Badbaadin: Caruurta xanaanadu waxay u baahan yihiin in la geliyo kuraasta nabadeed ee baabuurta (oo xagga dambe lagu xiro) waana in caruurta dhan loo geliyaa koofiyadda birta ah mar kasta ay bishkileeti fuulaan ama ay kabaha “skates”-ka ku socdaan. Wixi xog dheeraad ah ah ee badbaadinta ama sida loo helo koofiyadaha birta ee jaban iyo kuraasta baabuurta lagu xiro, wac Gudoonka Caafimaadka Dadweynaha Boston ee (617) 534-5197.

Mahad gaar ah waxa iska leh Cusbatalka Caruurta (Children’s Hospital) siday uga qayb qaateen farsamaynta xaanshidan caafimaadka.